

Jamhuuriyadda Somaliland
Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo
Teknaloojiyadda



Republic Of Somaliland
Ministry of Communication and
Technology

**Xeer-Nidaamiyaha la Socodka
Dhaqdhaqaaqa Isgaadhsiinta
2019**

ARAAR

Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyadda JSL

- Markaan Arkay:** Qodobka 3aad faqradihiisa 13aad iyo 14aad ee Xeerka Boosaha iyo Isgaashsiinta Jamhuuriyadda Somaliland Xeer Lr, 50/2011;
- Markaan Arkay:** Kobaca iyo hormarka baaxadda leh ee Isgaadhsiinta casriga ah oo ay hormood u yihiin Shirkaddaha Isgaadhsiinta dalku;
- Markaan Arkay:** Waajibaadka wasaaraddu qaranka u hayso masuulkana uga tahay oo ah mid balaadhan una baahan in loo fuliyo si haboon;
- Markaan Tixgaliyay:** Muhiimadda ay leedahay bixinta cashuuraha ku waajibay Shirkaddaha Isgaadhsiinta;
- Markaan Tixgaliyay:** Baahida loo qabo in la helo xeer-nidaamiye si haboon oo tifatiran u faahfaahiya hawlaha la socodka dhaqdhaqaaqa isgaadhsiinta si aanay u baaqan cashuuraha ku waajibay adeegyada isgaadhsiinta;
- Sidaa Daraaddeed;** Waxaan halkan ku soo saaray Xeer-Nidaamiyaha La Socodka Dhaqdhaqaaqa Isgaadhsiinta Dalka, Xeer Lr. 01/2019 oo ka kooban qodobadan soo socda;

CUTUBKA 1AAD

QODOBBO GUUD

Qodobka 1aad

Magaca Xeer-nidaamiyahan

Xeer-nidaamiyahan waxaa loogu yeedhayaa Xeer-nidaamiyaha La Socodka Dhaqdhaqaaqa Isgaadhsiinta, xeer-nidaamiye Lr 01/2019.

Qodobka 2aad

Erey Bixin

Xeer-nidaamiyahan dhexdiisa erayadan soo socda waxa loola jeedaa:

- 1) **Adeeg Isgaadhsiineed:** Waxa loo la jeedaa adeeg kasta oo loo fidiyo macaamiisha iyada oo la adeegsanayo shebekadaha isgaadhsiinta.
- 2) **Adeegyada Dheeraadka Ah (Value Added Service):** Waxa loo la jeedaa adeeg kasta oo ay bixiyaan ruqsadleyaashu marka laga reebo wicitaanada, internet-ka iyo farriimaha.
- 3) **Dhaqdhaqaaqa Isgaadhsiinta (Telecom Traffic):** Waxa loola jeedaa xaddiga adeegyada isgaadhsiineed ee ka dhex dhaca shebekadaha isgaadhsiinta ee kala duwan.
- 4) **Wicitaanada Xatooyada ah (Fraud Calls):** Waxa loola jeedaa wicitaanada xatooyada ah ee aan ka diiwaan gashanayn ruqsadlayaasha.
- 5) **Habka La Socodka Dhaqdhaqaaqyada Isgaadhsiinta (Tele-Traffic Monitoring System):** Waxa loola jeedaa qalabka lagula soconayo xaddiga adeegyada isgaadhsiineed ee dhex mara shebekadaha isgaadhsiinta.
- 6) **Isgaadhsiin:** Waxa loola jeedaa, lalin, diris, ama helis calaamad, biliig, xog, qoraal, maqal iyo muuqaal ah oo dhex mara shebekadaha.
- 7) **Kaydiyaha Faahfaahinta Wicitaanka "CDR":** Waxa loola jeedaa warbixin la sameeyay iyada oo la adeegsanayo qalab isgaadhsiineed taasi oo koobsanaysa macluumaad ku saabsan dhacdo dhex martay shebekadaha isgaadhsiinta.
- 8) **La Socod "Monitoring":** Waxa loo la jeedaa kormeerka dhaqdhaqaaqa isgaadhsiinta si loo hirgaliyo ujeedooyinka xeer-nidaamiyahan.
- 9) **Marin "Gateway":** Waxaa loo la jeedaa habka is-waydaarsiga xogta isgaadhsiinta la diro am la helo iyada oo lala soconayo dhaqdhaqaaqyada isgaadhsiinta.

- 10) **Ruqsadle:** Waxa loo la jeeda shirkad la siiyay ogolaansho ay ku bixin karto adeeg isgaadhsiineed si waafaqsan Xeerka Boosaha iyo Isgaadhsiinta Somaliland.
- 11) **SIM (Subscriber Identity Module):** Waxa loo la jeedaa kaadh loo adeegsado aaladaha isgaadhsiinta si loogu aqoonsado macmiilka.
- 12) **Shebakad Isgaadhsiin:** Waxa loo la jeedaa habka loo gudbiyo ama la isku waydaarsado xogaha isgaadhsiinta ee kala duwan.
- 13) **Shirkad Isgaadhsiin:** Waxa loo la jeeda shirkad ganacsi oo la siiyay ruqsad u ogolanaysa in ay bulshada u fidiso adeeg isgaadhsiineed.
- 14) **Wasaarad:** Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Teknoolajiyadda Somaliland.
- 15) **Wicitaanada Caalamiga ah (International Calls):** Waxa loo la jeedaa, Dhamaan dhaqdhaqaaqyada isgaadhsiineed ee soo galaya ama ka baxaya dalka kuna suurto galay xidhiidh ganacsi oo ka dhaxeeya shirkadaha dalka iyo kuwa caalamiga ah.
- 16) **Xaqiijinta Dakhliga:** Waxa loola jeedaa qaababka lagu hubin karo dakhliga isgaadhsiineed ee ruqsadlaha.
- 17) **Xeer:** Waxaa loola jeedaa Xeerka Boosaha iyo Isgaadhsiinta Somaliland Xeer **Lr. 51/2011**.
- 18) **Xog "Data":** Waxa loola jeedaa caddaymaha, qoraalada iyo tilmaamaha uu sameeyo nidaam isgaadhsiineed.

Qodobka 3aad

Xadka Dabbaqaadda Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan waxa lagu fulinayaa ruqsadlaha bixiya adeegyo isgaadhsiineed iyadoo la tixraacayo Xeerka Boosaha iyo Isgaadhsiinta Somaliland.

Qodobka 4aad

Ujeedooyinka Xeer-nidaamiyaha

Ujeedooyinka xeer-nidaamiyahan waxa ka mid ah:

1. In wasaaraddu ka hesho xogta ay uga baahan tahay shirkadaha haysta ruqsadaha isgaadhsiinta dalka.
2. In la xaqiijiyo ururinta iyo bixinta cashuurta ku waajibtay adeegyada ay bixiyaan shirkadaha isgaadhsiintu.
3. In la xoojiyo nidaamka wada shaqaynta wasaaradda iyo shirkadaha isgaadhsiinta;
4. In la xoojiyo awoodda maamul ee wasaaradda.

CUTUBKA 2AAD
SHAQADA IYO WAAJIBAADKA WASAARADDA

Qodobka 5aad

Shaqada Wasaaradda:

- 1) Wasaaraddu waxay mas’uul ka tahay hirgalinta nidaam si hufan loogu kormeerayo isgaadhsiinta dalka, nidaamkaas oo leh daah-furnaan iyo isla xisaabtan.
- 2) Si loo hirgaliyo masuuliyadda guud ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, Wasaaraddu waxay qabanaysaa shaqooyinkan soo socda;
 - a) Inay ka hirgaliso kana shaqaysiiso nidaam xaqiijinaya ujeedooyinka xeer-nidaamiyahan.
 - b) In ay sahamiso goobta la dhigayo Nidaamka La Socodka Dhaqdhaqaaqa Isgaadhsiinta iyadoo xaddidaysa talaabooyinka loo baahan yahay in la qaado iyo shuruudaha isku xidhka shabakadaha isgaadhsiinta.
 - c) In ay diyaariso, rakibto, ka shaqeysiiso, dayactirto qalabka iyo cabbiraadda lagula socon karo dhaqdhaqaaqa isgaadhsiinta ee ka dhex dhaca shabakadda ruqsadlaha.
 - d) In ay hubiso qaababka dhaqdhaqaaqa isgaadhsiinta ee ruqsadleyaasha iyadoo u maraysa kormeerka marinada isgaadhsiinta (gateway), nidaamka maamula biilasha iyo wicitaanada macmiisha.
 - e) In ay hubiso isla markaana kobciso dakhliga isgaadhsiinta, sidoo kalana xakamayso xatooyada wicitaanada dibadda (Fruad Calls).
 - f) In ay kormeerto ruqsadleyaasha si loo xaqiijiyo fulinta xeerka boosaha iyo isgaadhsiinta, wareegtooyinka iyo xeer-hoosaadyada la xidhiidha isgaadhsiinta.
 - g) In ay ka dalban karto kana heli karto xogta ay uga baahan tahay ruqsadleyaasha si waafaqsan xeer-nidaamiyahan.

- h) In ay hirgeliso nidaam lagu hubin karo cashuuraha ka soo xarooda adeegyada cashuurgalka ah ee isgaadhsiinta ku waajibay si waafaqsan Xeerka Dakhliga Cashuuraha Barriga Somaliland Xeer Lr.72/2016.
- i) In ay hirgaliso kana shaqaysiiso qalab suurto galinaya Hawlaha la Socodka Dhaqdhaqaaqa Isgaadhsiinta Dalka.
- j) Marka Wasaaraddu samaynayso kormeer si waafaqsan xeer-nidaamiyahan waxa goobjoog ka ahaanaya ruqsadleyaasha ama cid ay u igmadeen.

Qodobka 6aad

Masuuliyadda Wasaaradda ee Nidaamka La Socodka Dhaqdhaqaaqa

Isgaadhsiinta

- 1) Si ay u gudato waajibaadka ka saaran kormeerka adeegyada isgaadhsiinta Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Teknoolajiyaddu waxa ay:
 - a) Ka warhaynaysaa isbeddelka maalinlaha ah ee la xidhiidha dhaqdhaqaaqa adeegyada isgaadhsiinta ee shebekadaha gudaha iyo kuwa caalamiga ah.
 - b) Adeegsanaysaa halbeegyo muujinaya tayada adeegyada macaamiishu helayaan.
 - c) La soconaysaa dhaqdhaqaaqyada isgaadhsiinta ee xatooyada ah kuwaas oo dalka soo galaya ama ka baxaya.
- 2) Wasaaraddu waxa ay u igman-tahay ururinta xogaha ka yimaadda ruqsadleyaasha si waafaqsan qodobka 3aad faqradiisa 14aad ee Xeerka Boosaha iyo Isgaadhsiinta JSL si ay u suurto gasho la socodka tayada adeegyada kala duwan iyo xaddiga dhaqdhaqaaq ee ka dhex dhaca shebakadaha isgaadhsiinta.
- 3) Wasaaraddu waa inay hubisaa in xogta laga helayo ruqsadlayaashu tahay:
 - a) Mid loo ururiyay qaab waafaqsan xeernidamiyahan.
 - b) Mid sax ah oo aan waxba laga bedelin, laga reebin ama lagu darin.

Qodobka 7aad

Shaqada Qalabka La Socodka Dhaqdhaqaaqa Isgaadhsiinta

- 1) Iyadoo aanay wax u dhimayn tayada adeegga ruqsadlaha, qalabka la Socodka dhaqdhaqaaqa isgaadhsiintu waa inuu suurto geliyaa:

- a) La socodka tayada adeegga isgaadhsiinta.
- b) Diyaarinta tirakoob la xidhiidha dhaqaqaaqyada adeegyada kala duwan ee ka dhaca shabakadda ruqsadlaha.
- c) Helidda faahfaahinta dhaqdhaqaaqa dhammaan adeegyada isgaadhsiinta.
- d) Raadinta, helidda iyo xakamaynta wicitaanada iyo SIM-yada xatooyada ah.
- e) Ururinta iyo kaydinta xogta la xidhiidha adeegyada isgaadhsiinta si waafaqsan qodobka 6aad, faqraddiisa 2aad ee xeer-nidaamiyahan.
- f) Ogaanshaha tirakoobka dakhliga ee ruqsadlaha.

Qodobka 8aad

Ilaalinta Xogta

- 1) Wasaaradda waxa ku waajib ah in ay ilaaliso, xafiddo isla markaana kaydiso xogta dhaqdhaqaaqa isgaadhsiinta ee ay ka heshay ruqsadlayaasha.
- 2) Xogta dhaqdhaqaaqa Isgaadhsiinta ee Wasaaradu ku hesho si waafaqsan xeer-nidaamiyahan waxa loo tixgalinayaa sir u gaar ah ruqsadlaha, waxaana masuul ka ah ilaalinteeda wasaaradda, waxaana reebban in sifo aan sharciga waafaqsanayn looga faa'iidaysto ama loogu gudbiyo dhinac sadexaad.
- 3) Hawlwadeen kasta oo ka tirsan shaqaalaha wasaaradda oo sifo aan sharci ahayn u bixiya ama u shaaciya xogta uu ku helay shaqada uu u hayo wasaaradda ee la socodka dhaqdhaqaaqa isgaadhsiinta, waxaa uu mutaysanayaa ciqaabta ku xusan Xeerka Ciqaabta ee la xidhiidha faldambiyeedka bixinta sirta.
- 4) Xogta dhaqdhaqaaqa isgaadhsiinta ee ku xusan qodobkan waxa lagu bixin karaa oo kaliya marka ay hay'ad garsoor oo awood u lihi ogolaato.

Qodobka 9aad

Cashuurta Adeegyada Isgaadhsiinta

1. Wasaaraddu waxay diyaarinaysaa bil kasta dhamaadkeeda qaansheeg caddaynaysa dakhliga ka soo xarooday cashuurta GST-ga ah ee ay ka urururiyeen shirkadaha isgaadhsiintu macamiishooda qaab waafaqsan qodobka 164aad ee Xeerka Dakhliga Cashuuraha Berriga.
2. Wasaaraddu waxa ay diyaarinaysaa bil kasta dhamaadkeeda qaansheeg cadaynaysa dakhliga ku waajibay adeegyada cashuur galka ah ee ay ruqsadlayaashu u fidiyeen macaamiishooda.

3. Wasaaraddu waxa ay diyaarinaysaa dhammaadka sannad kasta qaansheeg caddaynaysa cashuurta ku waajibtay dakhliga sanadlaha ah ee ruqsadlayaasha.
4. Qaansheegta adeeg-yada cashuur-galka ah ee ay Wasaaraddu diyaarinayso bilkasta dhamaadkeeda waxay ku salaynaysa arrimahan:
 - a) Tirada daqiiqadaha wicitaanada gudaha iyo debedda.
 - b) Xaddiga internetka la isticmaalay.
 - c) Xaddiga lacagta ku shubashada ama biilka macmiilka loo dallacay.
 - d) Adeegyada farriimaha ee kala duwan.
 - e) Adeegyada dheeraadka ah ee isgaadhsiineed (Value Added Services).
5. Wasaaraddu qaansheegta ay diyaarisay waxa ay la wadaagaysaa Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda.
6. Ruqsadluhu haddii uu ku qanci waayo qaansheegta loo gudbiyay waxa uu ku wargalinayaa Wasaaradda muddo shan maalmood gudahood ah.
7. Wasaaradu marka ay hesho wargelinta cabashada ee ruqsadlaha, waa in ay ku xalisaa muddo todobada maalmood gudahood ah, kuna wargelisaa Wasaaradda Horumarinta Maaliyada natiijada cabashada ee ruqsadlaha.

CUTUBKA 3AAD

WAAJIBAADKA RUQSADLEYAASHA

Qodobka 10aad

Masuuliyadda Ruqsadlaha ee Nidaamka La Socodka Dhaqdhaqaaqa

Isgaadhsiinta

1. Si loo la socdo dhaqdhaqaaqa isgaadhsiinta, ruqsadluhu waa inuu:
 - a) U soo gudbiyaa wasaaradda dhamaan xogta looga baahdo iyada oo aan waxba laga baddalin, laga reebin ama lagu darin.
 - b) U ogoladaa wasaaradda ama cid kasta oo ay u soo igmatay inuu ku rakibo ama dayac tiro qalab loogu talo galay in lagu xidho shebekedda ruqsadlaha.
 - c) Kala shaqeeyaa wasaaradda isagoo siinaya goob ku habboon kana caawiyo in lagu rakibo qalabka la socodka marka looga baahdo.
 - d) U fududeeyaa rakibaadda qalabka isku-xidhka (lalinta) ee u dhaxeeya nidaamka ruqsadlaha iyo ka Wasaaradda, isagoo xogta la xidhiidha isku xidhka ku soo gudbinaya muddo todoba maalmood gudahooda ah.

Qodobka 11aad

Waajibaadka Bixinta Macluumaadka

1. Ruqsadle kasta waa inuu u gudbiyaa Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Teknaloojiyadda qodobadan:
 - a) Kaydiyaha Faahfaahinta Wicitaanada (CDR) ee dhamaan dhaqdhaqaaqyada isgaadhsiinta, uguna soo gudbiyaan qaabka iyo mudada ay wasaaraddu u astayso.
 - b) Xisaab-xidhada ay soo diraan shirkadaha caalamiga ah ee dhaqdhaqaaqyada isgaadhsiinta ku soo xidha ruqsadlayaasha Somaliland ama qaansheegta loo diro shirkadaha caalamiga ah.
 - c) Tirada daqiiqadaha iyo dakhliga dhaqdhaqaaqyada isgaadhsiinta ee ka dhaca shebekadaha ruqsadlayaasha dalka gudihisa iyo shirkadaha caalamiga ah ee heshiiska kula jira kuwa Somaliland.
 - d) Macluumaad kasta oo lagama maarmaan ah oo la xadhiidha shabakadda ruqsadleha ee bixinta adeegyada isgaadhsiinta iyo heshiisyada ay la wadaagaan shirkadaha kale.
2. Caddaynta dakhliga ee ku xusan xeer-nidaamiyahan waa in loo gudbiyaa Wasaaradda muddo aan ka dambayn maalinta saddexaad ee bil kasta.

Qodobka 12aad

Xogta Biligta (Signaling data)

1. Ruqsadluhu waa in uu kaydiyo xogaha isku xidhka ee loo yaqaan biligta (signaling data) ee laga maarmaanka u ah maaraynta dhaqdhaqaaqyada Isgaadhsiinta.
2. Xogta biligta si waafaqsan faqradda 1aad waa inay isugu jirtaa halka ay ka timid, halka ay ku socota, warbixinta adeega, wakhtiga iyo qaabka isgaadhsiinta la isugu gudbiyay.
3. Ruqsadluhu waa in uu markasta Wasaaradda ku wargeliyaa ka hor inta aanu samayn isbeddel ama casriyeyn habka biligta taas oo wadata wakhtiyadeeda oo faahfaasan isla markaana la jaan qaadi karta qalabka La Socodka Dhaqdhaqaaqa Isgaadhsiintu in uu si fiican u shaqeeyo.

Qodobka 13aad

Rakibidda Qalabka iyo Ilaalintooda

1. Haddii loo baahdo in qalab la dhigo xarumaha ruqsadlayaasha Wasaaraddu waxa ay heshiis la geli doontaa ruqsadlaha kaas oo qeexaya maaraynta, ka-shaqaysiinta iyo dayac-tirka qalabkaas.
2. Haddii loo baahdo, goobaha ay qalabku ku rakibanyihiin ee shebekadaha ruqsadleyaasha, ruqsadleyaashu waa in ay daryeelaan isla markaana ilaaliyaan amaanka qalabka.
3. Haddii qalab lagu rakibay xarumaha ruqsadlaha si xeer-nidaamiyahan waafaqsan uu soo gaadho burbur, dhaawacyo ama wax-yeello, heshiiska ku xusan faqradda 1aad ayaa lagu qeexayaa wixii mag-dhaw ah.

Qodobka 14aad

Maaraynta Goobaha la Wadaago

1. Wasaaradda ayaa go'aaminaysa hannaanka la xidhiidha gelitaanka, kormeerka, ka shaqaysiinta iyo dayac-tirka ee goobaha la wadaago iyada oo la socodsiinaysa ruqsadlaha si waafaqsan xeer-nidaamiyahan.
2. Haddii ay cillad farsamo ka dhacdo goobaha la wadaago xilliga lagu guda jiro rakibaadda, dayac-tirka, baddalaadda ama kormeerka, dhaawaca waxa lala socodsiinayaa Wasaaradda iyo ruqsadlaha ama cidda ay u igmadaan.
3. Wasaaradda iyo ruqsadluhu waa in ay ku wacyi-geliyaan oo ay hubiyaan in shaqaalahoodu ay ilaaliyaan una hoggaansamaan nidaamka loogu talagalay amaanka, marka ay dayactirayaan ama rakibayaan qalabka.

CUTUBKA 4AAD:

GUDIDA FARSAMO EE HIRGALINTA XEER-NIDAAMIYAHAN

Qodobka 15aad

Abuurista Guddi Farsamo

1. Si loo fuliyo waajibadyada iyo shaqooyinka ku xusan xeer-nidaamiyahan, Wasiirku waxaa uu magacaabi doonaa guddi farsamo oo ka kala socda dhinacyadan hoos ku xusan:

- a) Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyadda, laba xubnood.
 - b) Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda, laba xubnood.
 - c) Shirkad kasta oo haysata ruqsad isgaadhsiineed, hal xubin.
 - d) Xubnaha gudida farsamo ee aan ahayn kuwa ka socda Wasaaradda Isgaadhsiinta Iyo Tiknoolajiyadda, waxa soo xulaya maamulka hay'adda ama shirkadda ay ka tirsan yihiin kadib marka uu codsi ka helo Wasiirka.
2. Shaqada iyo masuuliyada gudida farsamo waxa ka mid ah;
- a) Inay fududeeyaan ka shaqaysiinta Qalabka La Socodka Dhaqdhaqaaqa Isgaadhsiinta.
 - b) Inay xalliyaan cilladaha farsamo ee ku yimaadda Qalabka La Socodka Dhaqdhaqaaqa Isgaadhsiinta.
 - c) Inay dardar galiyaan wada-shaqaynta farsamo ee ka dhaxaysa Wasaaradda iyo ruqsadlayaasha.

CUTUBKA 5AAD:

GABAGABO

Qodobka 16aad

Kaabista iyo Wax-bedelka Xeer-nidaamiyahan

1. Xeer-nidaamiyahan waxa lagu samayn karaa wax-ka-beddel iyo kaabis wakhtiga loo baahdo.
2. Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Teknooloojiyadda ayaa leh awoodda wax-ka-beddelka iyo kaabista xeer-nidaamiyahan.

Qodobka 17aad

Dhaqangalka Xeer-nidaamiyahan:

Xeer- nidaamiyahan waxa uu si rasmi ah u dhaqan geleya isla maalinta uu saxeexo Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Teknooloojiyadda laguna soo saaro faafinta rasmiga ah.

02/April/2019

Dr. CabdiWali Sh. Cabdillahi Suufi Jibriil

Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta & Tiknooloojiyadda.